



Sebteembar 2019

Waalidiinta/Mas'uuliyiinta/Daryeelayaasha Ardayda Fasalada 4, 6, iyo 8aad ee Dugsiyada Dadweynaha Buffalo:

Haddii aad xiisaynayso inaad u tixgeliso Canuggaaga waxbarashadiisa Dugsiga Dhexe/Sare ee Olmsted (# 156) ama Dugsiga City Honors (# 195), waxaa ikhtiyaar u leedahay ama kuu furan in **cunuggaaga hadda dhigta fasalada 4aad, 6aad, ama 8aad inuu ku galo karo imtixaanka oggolaanshaha Iskuulka uu hadda dhigto dhexdiisa maalmaha iskuulka caadiga ah si ugu biiro sanadka soo socda ee 2020-2021**. Khasab kuguma ahan inaad doorato ikhtiyaarkan. Waxaad weli kuu furan inaad ka qeybgasho Kulanka Sabtida ee Dugsiga Olmsted Middle/High (# 156), Bisha Oktoobar 26, saacadda 8:00 subaxnimo ee ardayda hadda dhigata fasalka 4aad iyo 6aad, iyo Kulanka ardayda hadda dhigata fasalka 8aad waa 1:00 galabnimo. Ka eeg shabakadda BPS jadwalka imtixaanaadka iyo macluumaadka ku saabsan shuruudaha kale ee oggolaanshaha: [www.buffaloschools.org](http://www.buffaloschools.org) Riix: "Olmsted 156/City Honors 195 Admissions"

Ardayda waxaa loo oggol yahay inay imtixaanka galaan hal jeer oo keliya. Halkaas Imtixaan ayaa loo isticmaala u qalmidda oggolaanshaha labada Iskuul. Imtixaanka lagu galaayo dugsiga ilmaha dhexdiisa waxaa loogu talagalay ardayda galaysa fasalka 5aad, 7aad, iyo 9aad ee 2020-2021. Waalidiinta BPS ee xiiseynaya boosaska xadidan ee heerarka fasalada kale waa inay ilmahooda galaan imtixaanka maalmaha Sabtida oo Jadwalka ku qoran. Ka eeg barta internetka BPS wixii faahfaahin ah.

**Looma baahna codsi dheeraad ah haddii ilmahaagu u fadhiisto imtixaanka aqbalitaanka.** Waxaa si otomaatig ah loogu meeleyn doonaa kursiga ugu suurtagalsan labadaba Olmsted Middle / High School (# 156) iyo City Honors Schools (# 195). **Sababtoo ah kuraasta way xaddidan yihiin, dhammaan ardayda dhigata fasallada 8aad waa inay sidoo kale buuxiyaan arjiga codsiga Dugsiyada Sare kale caadiga ah maadaama ay hadda ka gudbayan Dugsiga Hoose iyagoo la kaashanaya la-taliyehooda dugsiga.**

Hadaad jeceshahay in ilmahaagu ku galo imtixaanka gelitaanka dugsiga dhexdiisa, buuxi oo saxeex foomka oggolaanshaha ee hoose. Fadlan qof mas'uul ah ha ku soo celiyo foomka si toos ah xafiiska weyn ee dugsiga ilmahaaga, ugu dambayn Sebteembar 20, 2019. Imtixaanadu waxay dhammaan doonaa inta lagu jiro Oktoobar iyo Noofembar.

Wixii su'aalo ama taageero ah, fadlan wac Ms. Walker at 816-1583.

---

**JAR FOOMKAN KUNA SOO CELI XAFIISKA WEYN EE DUGSIGA ILMAHAAGA ugu dambeys *SEBTEEMBAR 20*. HAL FOOM CANUGGIIBA.**

***Frederick Law Olmsted Middle/High School P.S. #156 & City Honors P.S. #195  
Isdiwaangelinta Imtixaanka Oggolaanshaha Ardayda galeysa Fasalada 5, 7, or 9 in 2020-21***

Magaca Ardayga

Taariikhda Dhalashada

Lambarka Aqoonsiga Ardayga

Iskuulka uu hadda dhigto

Fasalka hadda ku jiro

Iskuulka Sanadkii Hore (2018-19)

Fasalka Sanadkii hore (2018-19)

Magaca Waalidka/Mas'uulka

Telefoon Lambarka

---

***CALAAMEY DHAMMAAN KUWA KHUSEEYA –CANUGGAYGA WUXUU LEEYAHAY:***

Waxbarashada Gaarka ah (IEP) \_\_\_\_\_ 504 ADA Plan \_\_\_\_\_ ENL Adeegyo (Af-Ingiriis sida Luuqad Cusub)\_\_\_\_\_

***“Putting Children & Families First to Ensure High Academic Achievement for All”***

